

# Ka guurista xerada iyo u guurista hoy kuu gaar ah

**1.****Ruqsadda deganaanshaha/sharciga**

Kaddib markii lagu siiyay ruqsadda deganaanshaha/sharciga, waxaad bilaabi kartaa inaad guri raadsato. Markii aad xaaladdaas ku sugan tahay, waxaad toos ula xiriiri kartaa aqal-kireeyaha ama waxaad buuxin kartaa foomka guryaha lagu codsado, kaasoo u baahnayn inaad isticmaasho aqoonsiga farsamada digitalka ku salaysan.

**2.****UDiiwaangelinta shisheeyaha – DVV [Digi- ja väestötietovirasto, Hay`adda farsamada digitalka diiwaangelinta iyo xogta dadwaynaha]**

Shaqaalaha xerada ayaa ka caawini doonaan sida ballan looga qabsado hay`adda DVV oo kaddib iska diiwaangeliso diiwaanka xogta dadwaynaha.

**3.****Kaarka caymiska FPA iyo caymiska bulshada ee dalka Finland**

Shaqaalaha xerada waxay kaloo ka caawini doonaan sida u soo guuritaanka dalka Finland loo diiwaangeliyo iyo sida loo codsado kaarka caymiska FPA.

**Xafiiska shaqada iyo ganacsiga**

Shaqaalaha xerada waxay kugu wargelin doonaan inaad iska diiwaangeliso Xafiiska shaqada TE-byrån.

**4.****Kaarka aqoonsiga (laga dalbado saldhigga booliska)**


Kaddib markii ay hirgasho diiwaangelinta DVV waxaad saldhigga booliska ka dalban kartaa kaarka aqoonsiga.

**5.****Akawntiga bangiga**

Kaddib markii aad iska diiwaangelisay diiwaanka xogta dadwaynaha oona lagu siiyay caddaynta aqoonsiga (kaarka aqoonsiga ama baasaboos), waxaad booqan kartaa bangi kaddib furan kartaa akawnt kana dalban kartaa in lagu siiyo koodka lagu gudagalo bangiga internetka.

**6.****Waxaad guri ka dalban kartaa shirkadaha guriyaha laga kireysto**

Kaddib markii aad sameysato koodka lagu gudagalo bangiga internetka, waxaad adigoo adeegsanayo koodka lagu gudagalo bangiga internetka, guri ka raadsan kartaa goobaha guryaha laga baadigoobo.



**DIGNIIN:** Goobaha guryaha laga baadigoobo waxaa ka hawlgala dad aqal-kireystayaasha khiyaana! Sidaas darteed, ka digtonoow haddii caawinaad guri helista darteed ay dadka noocaas ah kula soo xiriiraan.

# Kaddib markii aad aqal hesho

1.

## Tusmada guriga

Haddii aad hesho guri oo aad xiiso u muujiso, la xiriir aqal-kireeyaha kaddib booqo guriga ku talajirto inaad kireysato. Booqashada guriga kahor marna heshiiska aqal-kireysashada hoosta ha ka saxiixin. **OGEYSIIS:** Shirkadaha guryaha ee dowladda taageero dhaqaaleed ka helo (City rental apartments, M2, A-Kruunu) kahor inta aad hoosta ka saxiixin heshiiska guriga kuma siinayaan fursad aad guriga ku booqato.



2.

## Kormeerista qayb-guriga

Kahor inta aad qayb-guriga u guurin waa muhim ah in kormeeris xaaladdiisa lagu sameeyo - waa in taas lagu dhaqaaqo wadajir aqal-kireeyaha ama sida ugu dhaqsida badan kaddib markii aad u soo guurto. Wixii cillad ah oo ishaada ku dhacdo xasuus-qor ka qor waxaana ka qaaddaa sawirro. Sidaas ayaa aqal-kireeyaha ku wargelin kartaa in cilladaha aadan wax shaqo ku lahayn.



3.

## Hoos ka saxiixida heshiiska aqal-kireysashada

Kahor inta aad hoos ka saxiixin heshiiska aqal-kireysashada waa in si taxadarsan warbixinta ku qoran u aqrisato.



4.

## Wargelinta guuritaanka

Inaad adrees cusub u guurtay waa inaad ku wargeliso xafiiska boostada iyo hay'adda DVV. Adreeska cusub waxaad ka diiwaangelin kartaa xafiiska boostada ama barta internetka ee boostada. Adreeska cusub waxaad kaloo ku wargelin kartaa aqal-kireeyaha ama shirkadda maamusha guryaha.



5.

## Codsiyada FPA

Haddii daqli kuu gaar ah aadan lahayn, waxaad kaalmadhaqaaleed oo kirada isaga bixiso ka codsan kartaa FPA (kaalmadhaqaaleedka kirada [asumistuki], taageera-dhaqaaleedka daqliga [perustoimeentulotuki], dhigaalka kirada [vuokravakuus]). Waxaad booqan kartaa xafiiska FPA kaddib buuxin kartaa foom ama haddii aad haysato koodadka bangiyada internetka lagu gudagalo, waxaad kaalmadhaqaaleedyada ka codsan kartaa adigoo adeegsada baraha internetka.



6.

## Caymiska guriga

Waa in gurigaaga aad caymiska gelisaa. Shuruudaha aqal-kireeyaha waxaa caadi ahaan kamid ah in aqal-kireystaha uu leeyahay caymiska guriga. Heshiiska aqal-kireysashada ka hubso nooca heshiiska caymiska aad ku qasban tahay inaad shirkadaha la gasho. Haddii lagu siiyo kaalma-dhaqaaleed [perustoimeentulotuki] waxaad xaq ku leedahay in xitaa laga bixiyo kharashka caymiska.



7.


## Heshiiska korontada

Haddii guriga uusan lahayn heshiiska korontada ama kharashka korontada gooni loo bixiyo waa in shirkadaha korontada aad heshiis la gasho. Haddii lagu siiyo kaalma-dhaqaaleed [perustoimeentulotuki] waxaad xaq ku leedahay in xitaa laga bixiyo kharashka korontada.



# Ka guurista iyo u guurista qayb-guri kale

- 1. Muddada ogeysiinta**  
Kahor inta aad qayb-guriga ka guurin hubso nooca heshiiska guriga ee aad berri hore aqal-kireyaha la gashay, kaasoo noqon karo heshiis waqti xaddidan ama joogto aha. Muddada ogeysiinta ee heshiiska joogtada waa bil. Macnaha waxaa weeyaan in heshiiska kirada u ciribtirmi doono dhammaadka bisha ku xigta bishii aad shirkadda wargelisay ka guuritaanka guriga.



- 2. Tasmada guriga**  
Haddii aad hesho guri kaasoo xiiso u muujiso, la xiriir aqal-kireyaha kaddib booqo guriga ku talo jirto inaad kireysato. Booqashada guriga kahor marna heshiiska aqal-kireysashada hoosta ha ka saxiixin.



**OGEYSIIS:** Shirkadaha guryaha ee dowladda taageero dhaqaaleed ka hesho (City rental apartments, M2, A-Kruunu) kahor inta aad hoosta ka saxiixin heshiiska guriga kuma siinayaan fursad aad guriga ku booqato.

- 3. Kormeerista qayb-guriga**  
Kahor inta aad qayb-guriga u guurin waa muhim ah in kormeerista xaaladiis lagu sameeyo - waa in taas lagu dhaqaaqo wadajir aqal-kireyaha ama sida ugu dhaqsida badan kaddib markii aad u soo guurto. Xasuus-qor ka qor wixii cillad ah oo ishaada ku dhacdo waxaana ka qaada sawirro. Sidaas ayaa aqal-kireyaha ku wargelin kartaa in cilladaha aadan wax shaqo ku lahayn.




- 4. Hoos ka saxiixida heshiiska aqal-kireysashada**  
**Aqriso kaddib hubso in xogta**  
heshiiska ku qoran ay sax tahay kahor inta aad hoos ka saxiixin qoraalka heshiiska.



Kahor inta aad hoos ka saxiixin heshiiska aqal-kireysashada, hubso in taariikhda u heshiiska cusub hirgelin doono ay ku beegan tahay taariikhda u ciribtirmi doono heshiiska aqal-kireysashada oo aad berri hore gashay. Sidaas ayaa ugu hortegi kartaa in guri la`aan kugu dhacdo muddada labada heshiis ama aad laba kiro bixiso isla muddadaas.

- Ogeysiinta aqal ka guurista**  
Waa in aqal-kireyahaaga aad ogeysiiso aqal ka guurista, taasoo tusaale ku wargelin karto e-mail (eeg dhicida 1).

- 5. Guuritaanka isku diyaari**  
Daahid la`aan ballanso gaadiidka guuritaanka iyo dadkii guuritaanka gacan ka geysan lahaayeen. Ururso hantidaada kana nadiifi qayb-guri waxyaalaha adiga aad leedahay. Ha ilowin inaad xitaa faaruqiso kaydka.



- 6. Naadaafadda guuritaanka kahor**  
Kahor inta aad qayb-guriga ka guurin si taxadarsan u nadiifi.



- 7. Kahor inta aad qayb-guriga ka guurin si taxadarsan u nadiifi**  
Inaad adrees cusub u guurtay waa inaad wargeliso xafiiska boostada iyo hay`adda MDB. Adreeska cusub waxaad ka diiwaan gelin kartaa xafiiska boostada ama barta internetka ee boostada. Adreeska cusub waxaad kaloo wargelin kartaa aqal-kireyaha ama shirkadda mamusha guryaha.



- 8. Codsiyada FPA**  
Haddii FPA aad kaalmo-dhaqaaleed ka qaadato waa inaad guuritaanka wargeliso, sidoo kale waa inaad wargeliso haddii kharashka kirada wax iska beddesho.



- 9. Caymiska guriga**  
Waa in shirkadda caymiska guriga aad wargeliso inaad adreeska beddeshay.



- 10. Shirkadda korontada**  
Waa in shirkadda korontada aad wargeliso inaad adreeska beddeshay.

